# Adeegga Dabiibka Hadalka iyo Luqadda ee Carruurta

Talada loogu talagalay Waaldiinta iyo Daryeeleyaasha.

## Ciyaarta iyo wadaxiriirka carruurta

### Waa maxay Ciyaartu?

- Ciyaartu waa wax la sameeyo oo xiise uun lagu qaato, oo aanan hadaf lahayn
- Carruurta meel walba adduunka ka joogta ayaa ciyaara
- Carruurtu waxay ku ciyaaraan habab kaladuwan
- Waa in ilme walba loo oggolaado in ay ciyaaraan
- Noocyada ciyaarta qaarkood ayay dadka qaangaarka ahi la yaabi karaan ama ku caajisi karaan, laakiin carruurtu way xiiseeyaan.

### Maxay Ciyaartu Muhiim u tahay?

- Sababta ugu muhiimsan ee ay carruurtu u ciyaaraan waa si ay u xiise qaataan
- Laakiin ciyaartu waxay weliba ahmiyad badan u leedahay waxbarashada xataa
- Marka ay carruurtu ciyaaraan, waxay wax ka bartaan dunida iyaga ku hareersan. Waxay wax ku bartaan aragga, maqalka, iyo dareenka
- Ciyaartu waxay carruurtu dareensiisaa nabad ama badbaado iyo farxad. Waxay iyaga ka caawisaa in ay xirfado cusub bartaan
- Ciyaartu waxay carruurta ka caawisaa in ay bartaan la hadalka iyo la joogidda dadka kale
- Ma jiro hab sax ah ama qalad ah oo loo ciyaaro. Ciyaartu waxay carruurta ka caawisaa in ay xirfadaha ku celceliyaan oo ay ku roonaadaan
- Goorta dambe, waxay xirfadahan u isticmaali doonaan nolosha dhabta ah.

### Xirfadaha ay carruurtu ku bartaan ciyaarta

Carruurtu xirfado cusub ayay ku bartaan ciyaarta. Xirfadahani waxay taageeraan wadaxiriirkooda iyo hadalkooda. Waa kuwan xirfado muhiim ah oo ay carruurtu ku bartaan ciyaarta:

- Ficilka iyo natiijada – barashada haddii aad wax samayso, in uu wax kale dhaco. (Tusaale ahaan, riixidda badhan ayaa shay lagu ciyaaro soo boodsiisa.)
- Door qaadashada – barashada qaadashada doorkooda (matalan,tuuridda kubbad ama jaajuur daar lagu daro)
- Ciyaarta iska yeelyeelka – isticmaalidda sawirashada (matalan, iska yeelidda in qorigu uu seef yahay)

- Xiriirka bulsheed – barashada sida dadka kale loola joogo oo lagula xiriiro ciyaarta
- Ciyaartu kuma koobna uun xiise qaadashada– waxay carruurta ka caawisaa in ay xirfado muhiim ah bartaan.